

Mashaariicda Sii Wanaajinta Waddada 15th Ave S | SHAQADA WADDOOYINKA IYO JIDADKA AY DADKA MARAAN EE DHINAC SOCDA WADDOOYINKA AYAA DHOWAAN BILAABANAYA

Xagaagan, shaqaalaha ayaa ku mashquuli doonna degaankaaga iyaga oo ka shaqeynaya Mashruuca Horumarinta Waddada 15th Ave S. Shaqaalaha ayaa shaqadan ku dhammeyn doonna si dhaqso ah, si deggan, oo amaan ah intii suuragal ah. Jadwallada dhismaha waa kuwo mar kasta wax laga beddelo karo; booqo mareegtada mashruuca si aad u oggaato wixii ku soo kordha: seattle.gov/transportation/15th-Ave-S-AAC.

Goobaha laga hirgelin doonno dhismaha gaarka ah ayaa lagu xusay khariidadda, waxaanna ka mid ah:

- **GUGAAN:** Shaqada bulaacada, marinka iyo hagaajinta wadada, iyo dayactirka wadada halka S Spokane St ay kula kulanto S Columbian Way
- **BILAABANAYA BARTAMAHA-JUUN:** Shaqada habka biyo-saarista, horumarinta jidka ay dadka maraan ee dhinac socda waddada iyo kaabadka jidka, iyo dayactirka waddada S Spokane St
Laga soo bilaabo galbeedka, shaqaaluhu waxay diiradda saari doonnaan isgoysyada 15th ave S 16th Ave S, 17th Ave S, Alamo Pl S, iyo 18th Ave S.
- **SIDA UGGU DHAKHSIYAHA BADAN EE DABAYAAQADA BISHA JUUN:** Xoqidda laamiga waddada S Spokane St
Shaqadan, oo sagxadda waddada loogu diyaarinayso in laami la saaro sannadkan dabayaaqadiisa, ayaa waxaa la qaban doonaa waqti ama kaltan habeenkii ah ugu yaraan toddobaad.
- **BILAABANAYA DABAYAAQADA XAGAAGA:** Burburin, shaqada shubka, iyo cusboonaysiinta biyo-saarka biyaha roobka culus oo laga hirgelinayo jidadka S Spokane St iyo Beacon Ave S
Si loo yareeyo saameynta ay shaqooyinkani ku yeelanayaan qulqulka gaadiidka, shaqooyinka qaar waa in la qabtaa habeenkii iyo maalmaha fasaxa ee toddobaadka.

WAXA LA FILAYO INTA LAGU GUDA JIRO DHISMAHA

Saacadaha shaqada ee caadiga ah waa 6 subaxnimo (AM) ilaa 6 fiidnimo (PM) Isniinta ilaa Jimcaha, in kastoo shaqada habeenkii ama maalmaha fasaxa ee toddobaadkii ay noqon doonto mid lagama maarmaan ah. Saameynta dhismaha waxaa ka mid ah:

- ▶ Xiridda waddada oo ku-meelgaar ah iyadoo laga xirayo jidadka dhinacyada ka soo gala, xaddididda in la maro waddada S Spokane St
- ▶ Maalmaha fasaxa ee toddobaadka oo la xiro isgoysyada waaweyn
- ▶ Sawaxanka iyo giriika (xaaladaha qaarkood, Magaalada Seattle waxay oggolaan kartaa Kala-duwanaanshaha Qaylada oo Ku Meelgaarka ah si shaqada loogu oggolaado qayladeeda in ay dhaafto xaddadka qaylada ee caadiga ah)
- ▶ Boor iyo qashin
- ▶ Xiridda meesha u calaamadeysan dadka lugeynaya in ay jidka ka gudbaan iyo jidadka dhinac mara waddooyinka oo ay dadku ku lugeeyaan, iyo waddooyinka ku-meelgaarka ah ee loogu talagalay dadka lugeeya iyo kuwa baaskiilka wata
- ▶ Xiridda haadka iyo waddooyin ku-meelgaar ah oo loogu talagalay gaadiidka
- ▶ Qaban-qaabinta dhismaha iyo saameynta meesha baabuurka la dhigto ee u dhow goobaha shaqada
- ▶ Isku-daridda boosteejada baska ama xirid ku-meelgaar ah
- ▶ Xiridda jidka gala reeraha gurigooda (dadka deggan ayaa waqti hore la oggeysiin doonaa)


GUUDMARKA MASHRUUCA

Jidka 15th Ave S inta u dhaxeysa waddooyinka S Spokane St iyo S Angeline St ayaa bixiya isku-xir muhiim u ah dadka u socda iyo kuwa dhexmaraya Beacon Hill. Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) ayaa horumarinno ka wada marinkani oo isku dheelitiraya baahiyada dhammaan adeegsadyaasha sidaa daraadeed qof kasta ayaa si habboon oo amaan ah u tegaya meesha uu u socdo.

KU XIRNOW

Habka ugu wanaagsan ee loola socon doonna xiritaanka, waddooyinka ku-meelgaarka ah, iyo hawlaha shaqada waa in la booqdo mareegtada mashruuceenna iyo in la rukunto ogeysiisyada iimaylka iyo farriimaha qoraalka.

Macluumaad tarjuman ayaa laga heli karaa mareegtadeenna.



Have more questions? Interested in receiving project updates?

VISIT: seattle.gov/transportation/15th-Ave-S-AAC

EMAIL: 15thAveAAC@seattle.gov PHONE: (206) 775-8719



Seattle
Department of
Transportation

